FSNAU
Qaybta Falanqaynta Sugnaanta Cuntada iyo Nafaqada ee Soomaaliya

# Hubinta Cuntada & Nafaqada

La soo saaray 16kii Bishii 12aad, 2010

## Xog warranka Afar Meellaha – Fiirada Digniin ee Deyrta 10/11 dabadeed

- Cimilada
- Suuqyada
- Nafaqada
- Beeraha
- Xoolaha
- Colaada Sokeeye
- Arrimaha Gobolka ee Soo Shaacbaxaya
- Iskudhafka Falanqaynta Sugnaanta Cunnada

### Arrimaha Muhiimka ah

**Waxaa si cad u muuqda ififaale ah in xaaladda sugnaanta cuntada ay kasii xummaanayso inta badan habnololeedyada Soomaaliya, uguna wacan tahay sida aan la filaynin ee roobabkii uga hoos mareen sidii caadiga ahayd ooy sabatu tahay saadaasha hawada habdhaqanka La Nina. Saamaynta waxtar xumada roobabkii Deyrta ayaa sababay in dalaggii soo bixi lahaa ay waayaan inta badan dhulkii dalagga uu kasoo bixi jiray ee gobollada koonfureed, iyo si lixaad leh ooy u yraadeen biyihii iyo baadkii dhul-daaqsimeedka muhiimka ah ee dalka, oo xumeeyay xaladda xoolaha. Waxyaalahan soo kordhay ayaa muujinaya in waxsoosaarkii cuntada (firida, caanaha iyo hilibka) ee dalka ay yaraadaan, taasoo sbabi doonta in sicirka cuntada uu kordho tirade dadka cunto yarida haysana ay u badantahay inay kordhaan horraanta 2011.**

**Meelaha muhiimka ah ee halista ku jira waa dhulka roob-waraabka ee beer-xoolo-dhaqatada koonfureed iyo bartamaha Soomaaliya, halkaasoo waxsoosaarkii beeraha ay aad u saameysay roob xumada; dhalmada lo'da ee dadyowga xoolodhaqatada ee Xoolodhaqatada Koonfu-bari; dhammaan habnololeedyada gobollada Hiiraan iyo Bakool; gabi habnololeedka Deex; xoolo dhaqatada Cadduun, Dooxada Nugaal iyo Oogada Sool. Meelo ka mid ah aaggaasi ayaa dhowaan u dhibtoonaa xilliyo isku xigxiga oo roob yarow ah. Sidaa daraddeed, awoodda u adkeysiga dhibkan dhacay ee xilliga Jilaalka ba'an ayaa ah mid kooban, khaasatan dhulka haatan ku jira gurmadka banii'aadminimo. Waxtar xumada Deyrta, ayaa si fudud u saamayn doonta dadyawga ku dhaqan gobollada helay xilliyo hore oo isku xigxigay oo waxsoosaar wanaagsan, sida Baay iyo Gedo. Waxaa kaloo ku darid mudan qaybo ka mid ah Waqooyi-galbeed oo helay roobab Deyr oo caadi ah, sida Awdal, W.Galbeed iyo galbeedka beer-xoolo-dhaqatada Togdheer oon halis geli doonin.**


*Hayadda Sugnaanta Cuntada iyo Nafaqada ayaa iminka ka wadda baaris xilliyeedkii Deyrta 2010/11 dabadeed gabi waddanka oo idil natiijadana waxaa lasoo shaac bixin doonaa 28ka Bisha 1aad 2011. Xog dheeraad ah ka fiiri shabakadda www.fsnau.org*

### Arrimaha Muhiimka ah iyo Digniin Horaadka laga bixinayo Bisha 1aad ilaa Bisha 6aad 2011

***Hoos u Dhac aad ah oo ku dhacay Waxsoosaarka Beeraha ee Koonfurta***

Roobabkii deyrta 2010/11 ayaa in badan ka hooseeyay sidii caadiga ahayd dhul beereedka (diisha wabiga iyo beer-xoolodhaqatada) koonfurta Soomaaliya, si ba'anna u saameeyay bixitaankii dalaggii xilliga Deyrta, gaarahaan dhulka beer-xoolodhaqatada. Sidaa daraddeed, waxsoosaarka **haruurka, oo ah firida ay dadka saboolka ah ee Soomaaliya u badanyihii isticmaalkooda, ayaa la filayaa inuu in badan hoos uga dhaco sidii caadiga ahayd. Gobolka Baay, oo soo saara 70% haruurka gabi ahaan uu waddanku soosaaro sanada dhexdhexxadka ahi, ayaa sidoo kale ay saamaysay roob xumada taasoo keeni doonta hoos u dhac ku yimaadda waxsoosaarka dalagga. Dhulka diisha wabiga, oo sida xooga leh looga beero gallayda beeraha waraabka ah, ayaa waxsoosaarkooda u badan tahay inay ka hoos maraan sidii caadiga ahayd iyadooy ugu wacan tahay awoodda waraabka ee xaddidan heerka biyaha wabiga oo hoos u dhacay awigeed.**

***Waxaa ku darid mudan, kharashka waxsoosaarka Galleyda*** ayaa aad uga badan sidii caadiga ahayd xilligan, uguna wacan tahay korodhka isticmaalka waraabka roobka la waayay awigeed. Waxyeellada waxtarka roob xumada ayaa ku yaraan doonta dhulka diisha wabiga ee gobollada Shabelle, uguna wacantahay korodhka waxsoosaarka balka/cowska iyo waxsoosaarkii u dambeeyay oo aad u badnaa. Waxaa taa ka duwan, Diisha wabi ee Juba, oo u dhibttoday waxsoosaar yaridii xilligii Guga, oo laga yaabo inay kusii nagaadaan wajigii Gurmadka ee sugnaanta cuntada. Ififaalaha hore ee shayda firida ee yaraatay, ayaa tarjuntay sicirka firida ee sare isu shareeray ee Bishii 11aad ee koonfurta. Isbeddelka sicirka oon raacin siddii xilliga caadiga u ahayd, ayaa mujinaya in kaydsiga firida uu kordhay iyadoo la aaminsan yahay in Deyrtu waxsoosaarkeedu yaraan doono.




Taxanaha Xilliyada iyo Arrimaha ugu Waaweyn ee Dhacay

FSNAU - Somalia
United Nations Somalia, Ngecha Road Campus
Box 1230, Village Market, Nairobi, Kenya
Tel: +254-20-4000500
Cell: +254-722-202146 / 733-616881
Fax: +254-20-4000555
Email: info@fsnau.org
Website: www.fsnau.org

***Gobollada Dhexe iyo Hiiraan oo Weli ku sii Jiraya Gurmad Banii'aadminimo***

Gabi ahaan gobolka Hiraan iyo inta badan gobollada dhexe, ayaa u dhibtooday roobabka ka hooseeya sidii caadiga ahayd, oo sbabay dalaggii oo bixi waaya, xaaladda daaqsinka oo sii xumaata iyo biyo yari ba'an. Meelaha dhibban waa dhammaan habnololeedyada gobolka Hiiraan iyo weliba dhulka Deexda, Xoolodhaqatada Cadduun iyo Digir Tacbatada. Dadyawga saboolka ah ee xoolodhaqatada ee gobolladan ayaa xaddidan fursadaha hayaanka, iyadooy yaryihiin hantida ay haystaan awoodooda iska caabineed oo dhammaatay abaarihii isdaba joogay awigeed.

Inkastoo waxtarka roobaka uu in yar wanaagsanaa dhul daaqsimeedka muhiimka ah ee Hawdka, daaqsinka iminka jira ayaa si dhaqso ah u dhammaan doona iyadooy ugu wacan tahay sida daran ee xoolaha faraha badan ee kasoo guuray deriska u daaqayaan. Guud ahaan, gobolladan oo horay ugu jiray ***Gurmad Banii'aadminnimo*** dhowrkii xilliyee lasoo dhaafay, ayay u badan tahay inuu sii galo dhib intaa kasii ballaaran, kaasoo sii dheereyn doona muddadii kasoo kabashada ee mustaqbalka. Xaaladdu waxaa sii xummeeyay iska horimaadyada kusii fidaya dhulkaasi oo yareeyay gurmadka, oo xaddiday awooddii hayadaha gurmadka ee ugu fidin lahaayeen taageero heerkii loo bahnaa ah.

***Muuqaalka Sugnaanta Cuntada ee Waqooyiga oo kala Duwan***

Xaaladda sugnaanta cuntada ayaa kasii xummaanaysa habnololeedyo badan oo waqooyiga ah oo roobkii Deyrta waayay. Dhulalka uu si gaar ah dhibka u taabtay ayaa ah Deexda, Cadduunka iyo Oogada Soolka, halkaasoo xooluhu ay sii weydoobayaan uguna wacan tahay sida ba'an ee cawska iyo biyahaba usii dhammaanayaan. Xaaladdu waa ay kasii dari doontaa madaama uu xilligii Jiilaalka dheer uu soo hayo iyo fursaddihii daaqsinka lagu heleyayna ay gabaabsi sii noqonayaan.

Dhulalaka waqooyiga ee helay roobab dhexdhexaad ah ayaa la kulmaya daaq iyo biyo yari uguna wacan tahay xoolo badan oo kaga soo guray dhulalka roob yarida ku dhacday eek u wareegsan. Inkastoo saamaynta sicir kororka firida ee koonfurta aanay weli ka muuqan waqooyi-bari, waxay u badantahay in sicirku kordho meelahan, maadaama ay ku tiirsanyihiin sahayda firida ee ka imanaysa koonfurta Soomaaliya. Balse waxaa taa ka duwan, muqaalaka sugnaanta cuntada ee Awdal iyo W. Galbeed iyo qaybta galbeed ee beer-xoolodhaqatada Togdheer oo haatan wanaagsan, ayagoo goostay dalag aad u wanaagsan Gu/Karantii dhaweyd, biyo iyo baadna la helayo ka dib markii ay heleen roobab Deyr oo waxtarkoodu dhexdhexaad yahay.

***Sicirka Firida ee Sare u kacay oo Saamayn ku yeeshay Sugnaanta Cuntada Reer Magaalka***

Natiijadii ka dhalatay aragtidii hore ee waxsoosaarkii Deyrta ee la waayay, sicirka firida ayaa sare u kacay si wax ku ool ah dhulalka sida weyn u soosaara firida, kaasoo dhabtii raad ku yeelanaysa sicirka ee qaybaha kale ee dalka, gaar ahaan gobollada bartamaha iyo waqooyiga. Sicir kororka wuxuu ka muuqdaa alaabta muhiimka ah ee waxa ugu yar ee salladda qoyska ee deegaannada reer magaalka, sida sokorta, saliida wax lagu karsado iyo weliba caanaha, ka dib markii ay caalamku ka kaceen sicirka reer miyiguna ay wax yareeyeen.

Maadaama reer dadka magaalka ay ku tiirsan yihiin cunno iibsiga, sicir bararka cunnada ayaa si ishortaag lahayn u horseedaya cunno helidda oo xumaata iyo tirada dadka ku dhiban magaalooyinka oo kordha. Awoodda wax iibsiga ee saboolka reer magaalka ayay mar hore saamaysay hoos u dhaca habka wax kala iibsiga kordhisayna kharshyada nolosha. Dadka reer magaalka ah ee koonfurta iyo bartamaha ayay u badan tahay inay saamayso, madaama xaaladda nabadda bulshadu ee aagaggasi aanay degganayn, una badan tahay inay sii ahaato hawsha ugu weyn sidii loo fududeyn waxyeelayada sicirkan kordhaya iyadoo adeegsanayo gurmad samofaleed.

***Xaaladda Nafaqo ee Gobollada Bartamaha iyo Waqooyiga oo soo Hagaagay***

Heerka nafaqada ee kazoo baxay sahankii nafaqada ee ugu dambeeyay oo laga qabtay gobollada bartamaha iyo waqooyiga ayaa muujinaya soo kabasho oo ku warbixinaysa herarka Nafaqodarrida Ba'an ee Caalamiga ah oo ka yar <15%. Kazoo reyntan waxay u badantahay inay ugu wacantahay waxtarkii wanaagsanaa ee Guga, kaasoo kordhiya helitaanka caanaha iyo dakhliga qoysaska, iyo weliba u qasadkii kaalmada samafaleed. Balse waxaa taa ka duwan, waxaa jiraa walaac laga qabo in xaaladdu si dhakhso ah u xumaato markaad eegto siday sugnaanta cuntada u muqato.


# Fiiro Gaar ah Qaybaha

## CIMILADA

### Waxtarka Roobka

Roobabkii Deyrtan 2010 (Bishii 10aad – 12 aad) ayaa inteeda badani waxay ahayd mid ku liidata dalka intiisa badan uguna wacanayd La Nina. Roobabka Deyrta 2010 waa ku kala duwanaayeen muddada iyo baaxaddaba ee dalka. Meelo ka mid ah miyiga Waqooyiga, sida aagga Golis/Guban, Gobollada Awdal iyo Galbeed intooda badan iyo qaybo ka mid ah Hawdka ee gobolka Togdheer, roobaka Deyrta waxay billabmeen bartamihii Bishii 9aad oo mujinaya in roobabku bilaabmen goor hore.

Kharidadda 1: Qiyaas Wadareed Roobabkii Deyrta





Source: NOAA

Roobabkani waxay da'ayeen ilaa Bishii 10aad. Si kastaba ha ahaatee, Waqooyiga intiisa badani waxay roobabku da'een bartamihii ilaa dhamaadkii bishii 10aad. Roobab u dhexeeya kuwo fudud iyo dhexdhexaad oo gaadhaya 1 ilaa 25mm, ayay heleen Waqoyi Galbeed, Togdheer, Sanaag, Sool, Nugaal. Heer taa la mid ah waxaa helay qaybo ka mid ah Mudug oo ka mid ah gobollada dhexe, ooy ka mid yihiin Hawdka Burtinle, Galdogob iyo Galkacy. Waxaase taa ka duwan, xogta laga helay dalka gudihiisa, dhulka bartamaha iyo waqooyiga intiisa badani waa qallayl, gaar ahaan Gobolka Bari, qaybo ka mid ah Sanaag iyo xoolodhaqatada Cadduunka Deexda gobollada Bartamaha iyo Nugaal. Dhulka koonfurta, roobakii Deyrta waxay ahaayeen teelteel oo waliba ka liita sidii caadiga ahayd Bishii 10aad, gaar ahaan gobollada Shabeelllooyinka. Sidoo kale, muddadii Bishii 11aad, rooba la'aan ayaa ku baahday dalka intiisa badan oo roob aad u yar ama roob la'aan ayaa laga soo minguuriyay. Guud ahaan waxtarkii roobabkii da'ay Bishii 11aad waxay ahaayeen kuwo aad uga hooseeya sidii caadiga ahayd.

Isbarbardhigga xogta roobabkii da'ay 10kii dambe ee Bishii 11aad 2010 iyo Celceliska Muddada Dheer (CMD) oo isla mudddadaa ah, ayaa muujinaya in dalka intiisa badani uu helay 0-15 boqolkiiba heerka roobabka da' xilli-sanadeedkanoo kale ee caadiga ah. Dhulalka helay roobabka heerka ugu hooseeya marka la barbar dhigo CMD ayaa ka mid ah Bari, qaybo ka mid ah Sool iyo Sanaag, Deexda Nugaal iyo Mudug ooy ku jiraan Eyl, Ceeldheer, Xaradheere iyo Hobyo. Xagga koonfurta, roobab gaargaar ah ayay heleen Gobollada Jubba iyo Shabeele Bishii 11aad, dhulka dhibban ee koonfurta waxaa ka mid ah Masaggo Tabcatada ee gobollada Bay, Bakool, Hiraan iyo qaybo ka mid ah Gedo, halkaasoo roobabku ay ahaayeen kuwa aan is raacin, fudud oo dhul yar ku kooban, dhulkan intiisa abdan waxay heleen wax ka yar 10mm oo roob ah (Khariidadda 1)

Kharidadda 2: TCDD ee Tobanlihii1aad Bishii 12aad 2010




Source: JRC/MARS FOOD

### Xaaladda Daaqsinka

Marka la eego dabeecaddii liidatay ee roobabka, heerka daaqsinka aad ayuu uga hooseeyaa sidii caadiga ahayd inta badan Somaaliya. Sawirka Dayax-gacmeedku iyo warbixinta ka imanaysa dalka ayaa xaqiijisay xaaladda daaqsinka uu liito weliba qaybo ka mid ah Jubba, Awdal, Bari, Gedo iyo Bay oo helay xoogaa shuux ah bishii 11aad. Dayax-gacmeedka oo xiganaya falanqaynta xogta Tusaha Caadaynta Duwanaanshaha Daaqa (TCDD) (DHIBICDA DAAQSINKA) ayaa muujinaya in xaaladda daaqsinka iyo dalgaba ee inta badan ee koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya uu ka hooseyo sidii caadiga ahayd. Habnololeedka Deexda ee Nugaal, Mudug iyo Galgaduud ayaa ugu sii daran dhibaatada. Dhul beereedka koonfurta, ooy ku jiraan dhul waraabka Wabiga Shabelle iyo weliba beer-xoolodhaqatada gobolka Bay, ayay iyana ka muuqataa hoos u dhac weyn xaaladdooda. Waqqoyiga intiisa badan, oo ka duwan, ayaa gobollada qaarkood uu xaaladda daaqsinka uu yahay dhexdhexaad amaba ka sarreeyaa sida Gabileey, Boorama, iyo Ceerigaabo, uguna wacantahay roobab dhexdhexaad ooy heleen (Khariidadda 2).

**COLAADDA SOKEEYE**

Koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya ayaa weli u baaba'aya iskahorimaadyo iyo nabadgelyo darri oo keenay dhimasho banii'aadam, baaba' hantiyeed, khalkhal habnololeed iyo barakac ummadeed labadii bilood ee lasoo dhaafay (Bilihii 10aad – 11aad). Iskahorimaadyo aan kala go' lahayn oo dhexmaraya kooxaha iskasoo horjeeda ayaa ka jira gobollada Muqdisho iyo Galgaduud, halka iskahorimaadyo marmar ah ay ka dhaceen qaybo ka mid ah Gedo (Beletxawo) iyo Bakool (Rabdhuurre & Yeed). Waxaa taa ka duwan colaadii ka dhex aloosnayd dawladda Puntland iyo kooxdii kasoo horjeeday ee aagga Galgala magaalada Boosaaso intii u dhexeysay Bishii 6aad iyo Bishii 10aad ayay u egtahay inay dantay, maadaama aan wax iskahorimaadyo ah laga soo sheegin Bilihii 11aad iyo 12aad. Balse, dhowr iskahorimaadyo ku saabsan daaqsinka iyo aargudasho ayaa ka dhacay labdii bilood ee u dambeeysay (Bilihii 10aad-11aad) meelo ka mid ah waqooyiga, gaarahaan dhulka u dhexeeya xadka degmooyinka Burco iyo Buuhoodle, iyo weliba aagga Gelinsoor iyo Godad ee Gobollada Dhexe ee Galgaduud iyo Mudug. Colaadani waxay sababtay dhimasho dadeed iyo barakac dadweyne. Waxaa cad in dagaalkan socda uu dadku ka bixinayo habnololeedyadooda, gaarahaan kuwa caasimadda Muqdisho. Marka lasoo xigto Guddiga u Taagan Wadaagga Hayadaha (GTWH) lasocoshada dhaqdhaqaaqa dadka (LDhD), in ku dhow 32,600 ruux ayaa ky barakacay dalka oo dhan intii u dhexeysay 1[dii] Bishii 10aad iyo 26[kii] Bishii 11aad, uguna wacantahay collaadan curyaaminaysa dalka. Barakaca intiisa badani waxay ka dhacday Muqdisho (19,000), Shabellooyinka (4,570), Beletweyne ee Hiraan (3,260), Beledxawo ee Gedo (1,850) iyo meelaha kale ee koonfurt Soomaaliya. Colaad qabiileedka sare ku xusan ee waqooyiga, gaarahaan aagga Burco iyo Buuhoodle u dhexeeya ayaa cidi ka baracaday. In kastoo ay colaadi ka aloosan tahay Gobollada Dhexe ( gaarahaan gobolka Galgaduud), wax barakac ah kama dhicin. Barakacyaasha intooda badan ayaa weli ku nool qaybaha kala duwan ee Muqdisho, halka kuwa kale ay u qaxeen Hiiraan iyo qaybaha kale ee dalka. Qaar ka mid ah barakacayaasha ayaa isku dayay inay soo gaaraan xeryaha qaxootiga ee Kenya ayagoo xadka kasoo galaya Ceelwaaq, Dhobleey iyo Beletxaawo. Hase yeeshee, xadka oo xiran awigeed tan iyo horraantii 2007[da] ooy Dawladda Kenya xidhay, barakacayaasha intooda badan ma awoodaan inay qaxootinnimo usoo galaan xeryahan. Sida xogtii Bishii 11aad ee GTWH LDhD, in ku dhow 2,500 oo dad ah ayaa ku xanniban xadka Kenya-Soomaaliya.




***Barakacayaasha Xerada Carafat, Galkacyo, Soomaaliya, FSNAU, Bishii 11aad '10***

Burcad badeedda waa aragti kale oo iskahorimaadyo iyo collaad ka jirta Soomaaliya. Marka lagu daro culayska la saaray maraakiibta caalamka ee maraysa xeebaha Soomaaliya, hawlaha burcad badeedda ayaa sii kordhaysa dhibna ku haysa dhaqaalaha kalluumaysiga deegaanka, khaasatan labadii sano ee dambaysay (2009 iyo 2010). Hawlaha burcadbadeedda ayaa iska hortaagay kalluumaysatadii deegaanka gobollada Bartamaha iyo Waqooyi Bari inay waxsoosaaraan, waxay kaloo si wax ku ool ah u yareeyeen baahidii waxsoosaarka kalluunka ee ganacsatada ajaanibka (Yaman iyo dawladaha kale ee Khaliijka). Inkastoo ay jiraan dadaal kordhaya oo caalami si looga hortago hawlaha burcad badeedda xeebaha Soomaaliya, burcad badeeddu waxay weli awoodaan dhib gaarsiiyaan qaybta kalluumaysiga Soomaaliya iyo dhaqaalaha, waxyeeleeyaanna dad badanoo reer xeebeed ah cunno helistooda.

Jawiga aan saaxiib iyo nabadba lahayn ayaa weli ah waxa horyaalla hawlwadeennada samafalka si ay uga hawlgalaan baahida dadka tabaalaysan, gaar ahaan koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya. Inkastoo joogista shaqaalaha caalamiga ee koonfurta iyo bartamaha ay hadda kordheen, gargaarka banii'aadminimo ee meelahan intooda badan ayaa weli xadidan marka loo eego sanadkii hore, ka dib markii ay kasoo baxeen hayadaha caalamiga ah meelahaasi Bishii 1aad 2010 nabadgalyo darri awigeed. Balse, kororka joogitaanka waqooyiga awigeed, tirada shaqaalaha caalamiga ah ee joogta Soomaaliya ayaa hadda lagu qiyaasaa 230 ruux[1], oo ah in ku dhow 30 boqolkiiba ka sarreysa marka la barbar dhigo billowgii sanadka (Jaantuska 1).

**Jaantuska 1: Shaqaalaha Qaramada Midoobay iyo kuwa Caalamiga ee Jooga Soomaaliya (Bishii 10aad 2010)**





Wariye: OCHA Soomaaliya – Dhamaystirka Xogta Dhaqdhaqaaqa Samafalka (Bishii 10aad 2010)

1 wariye: Qaramad Midoobay Waaxda Nabadgelyada iyo Ammaanka, Bishii 10aad 2010

## BEERAHA

Ififaalaha waxsoosaarka firida ee xilliga Deyrta ee koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya ayaa aad u liita ka dib roobabka Deyrta oo aad u liita, oo six un u saameeyay bixitaankii beeraha, abuur biqilka iyo korriinkaba. Waxaa middan ka duwan Waqooyi-galbeed oo iyagu dhulka beer-xoolodhaqatada goostay dalaggii Gu/Karanta intii u dhaxeysay Bishii 10aad-11aad, oo ahayd mid aad uga badan sidii caadiga ahayd uguna wacnayd waxtarkii roobabka oo fiicnaa (fiiri FSNAU Xogtii Koobnayd ee Sugnaanta Cuntada iyo Nafaqada, Bishii 11aad 6dii 2010). Beer-xoolodhaqatada Togdheer, oo beerata haruurka muddada gaaban, ayaa horumarkii dalagga saameeyay qoyaan la'aan Bishii 9aad. Dalaggan ayaa badbaadi haddii roobabi markale ka curtain habnololeedka Golis Bisha 1aad 2011.



***Beer la abuuray oon soo bixin, Tuulada Garasmaamow, Waajid, Bakool, FSNAU, Bisha 10aad, 2010***


Dalagga Deyrta ee dhulka roob-waraabka ee koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya ayaa ku sugan xaalad xun marka la barbar dhigo kuwa waraab-webiga, uguna wacan tahay xaaladda ingeega ah ee muddadii Deyrta oo dhami jirtay. Sida lagu warbixinayo, beeruhu mayna soo bixin inta badan habnololeedyada beer-xoolodhaqatada ee Jubba, Gedo, Shabelle, Hiiraan, Bakool, Baay iyo weliba Digir Tabcatada Gobollada Dhexe. Meelo ka mid ah degmooyinka Baydhabo iyo Diinsoor ee Baay iyo Degmada Baardheere ee Gedo, dalagga roobka ku baxa ayaa soo biqlay, balse, korrinka dalagga ayaa liita, waxaana ugu wacan roobabka oo xadidan heerkii billowga ee dalagga. Dalaggii baxay ee dhulka roob-waraabka oo hadda jira 50-55 maalmood ayaa u dhibaataysan qoyaan la'aan, waxayna u badan tahay in dalaggani ba'o.

Roob la'aantu waxay kaloo sababtay in si kala duwan u koraan dalagga ku yaala dhulka waraab-webiga ee koonfurta Soomaaliya. Roobabka goosgooska ahi ee Deyrta awigeed, beerallayda ayaa waraabinaya dalaggooda ayagoo adeegsanaya cufsi-jiid waraab meelo ka mid ah Shabelle iyo matoor waraab agagaarka Wabiga Jubba. Si kastaba ha ahaatee, roob yaridu waxay keentay in heerka biyaha webiga uu hoos u dhaco saamayna ku yeelato awoodda waraabka, isla markaana sare u kaco tartanka waraabka ee ka dhexeeya beerallayda. Guud ahaan, habnololeedyada Diil-webi, dhulka ay dalagga cuntada ay ku yaaliin, aad ayay uga hooseeyaan sidii caadiga ahayd xilliga sanadkan, uguna wacan tahy dhowr waxyaalood isku jira, kana mid yihiin, ciriiriga waraabka ka dib markii uu heerka biyaha wabiga uu hoos u dhacay, biyihii fatahadda ee Gugii 2010 oo weli fadhiya dhulbeereedkii gobollada Jubba iyo kororka bal abuurka ka dib markii uu xoogsaday baahida dadyowga reer guuraaga.

### *Sicirka Firida*


Firida dalka (Gallayd iyo Haruurka) isbeddellada sicirkooda intii u dhexeysay Bishii 6aad iyo Bishii 11aad 2010, ayaa kala duwan suuqyada misaalka u ah dhulka firida laga beero. Si aad ah ayuu sicirka firida uga kacay intii u dhexeysay bilihii 10aad iyo 11aad 2010 gobollada firida laga beerto ee koonfurta Soomaaliya, aydooy ugu wacan tahay in la aaminay waxsoosaarka Deyrta inuu xumaanayo. Ififaalaha waxsoosaarka Deyrta ee liita ee koonfurta, ayaa sicirka firida la filayaa inuu sii kordhi doono bilaha soo socda. Si kastab ha ahaatee, sicirka gallayda ee inta badan suuqyada diil-webi ee gobollada Shabeellooyinka ayaa 5-19 boqolkiiba ka hooseeya marka loo eego heerarkii Bishii 6aad 2010, uguna wacantahay sahayda suuqayada ee gallayda oo kordhay ka dib markii waxsoosaar wanagsan Gugii 2010ka la goostay. Balse, sicirka firida ayaa ka kordhay inta badan gobollada koonfunrta. Magac ahaan, Diil-webi Jubba, sicirka gallayda waxay kacday 6-13 boqolkiiba tan iyo Bishii 6aad 2010, uguna wacantahay waxsoosaarkii oo hoos udhacay habnololeedyada uu saameeyay fatahaaddii Guga 2010. Sicirka gallayda ee suuqyada ku yaalla demooyinka laga tabco ayaa kala duwan. Sicirka galleyda ugu sarreeya ee Bishii 11aad oo ah (= 10,000 ShSo/Kg) ayaa laga soo qoray suuqa Jowhar iyo Bu'aale, halka sicirka ugu hooseeya oo Qoryooleey ah uu ahaa (6,890 SoSh/Kg) iyo Jammaame (7,320 SoSh/Kg). Sicirkan hoose ee labadan degmo ayaa u sabab ah waxsoosaarkii wanaagsanaa ee Guga (Qoryooleey) iyo Xilli-dambeedkii Guga (Jammaame). Waxaa ka duwan, sicirka firida ee u sarreeya ee gobollada Jubba iyo Shabelle ayaa laga soo qoray dhulka xoolo-dhaqatada uguna wacantahay ka go'naanta degmooyinka sida aadka ah looga tabco (Jaantuska 2).

**Jaantuska 2: Isbeddellada Sicirka Galleyda ee Diil-webiga Jubba iyo Shabeelle**




Haruur Tabcatada, sicirka haruurka ayaa isna muujiyay koror tan iyo Bishii 6aad 2010. Kororka ugu sarreeya waxaa laga helay Beletweyne (20%) iyo luuq (33%) uguna wacantahay sahaydoo yar ka dib markii dhowr xilliyoo isdba jog ah uu waxsoosaarku liitay, deyrtanna ay ku jirto ganacsigiina khalkhal galay colaad awigeed. Sicir kororka ayaa si xooggan ug muuqda gobolka Baay uguna wacan tahay dalabka meelaha kale oo kordhaya, ooy ka mid tahay caasimadda Muqdisho, Bartamaha iyo gobollada deriska la ah iyo weliba xeryaha qaxootiga ee Kenya. Kororkan dalabka iyo waxsoosaarka Deyrta ood mooddo in la waayi doono, ganacsatada firida ayaa kordhiyayiibsiga haruurka iyagoo ku haminaya inay sicir sare ku iibin doonaan Deyrta dabadeed. Balse, sicirka haruurka weli wuu ugu hooseeyaa gobolka Baay (7,400-8,500 SoSh/Kg) marka la barbar dhigo suuqyada kale Haruur Tabcatada (Jaantuska 3).

**Jaantuska 3: Isbeddellada Sicirka Haruurka ee Haruur Tabcatada**




Kororka sicirka firida ee intii u dhexeysay Bishii 6aad iyo 11aad 2010, ayaa tarjumaysa in awoodda wax iibsiga uu wiiqmayo qoysaska ku nool magaalooyinka gobolka Hiiraan (21%), Baay (25-29%) iyo Bakool (20%). Waxaa ka duwan taa, ka dib markii sicirka gallayda uu hoos udhacay Shabeellooyinka isla muddadaa, Niddamka Waxkala Badalashada (NWB) ee u dhexeeyay mushqaayad maalmeedka iyo galleyda ayaa kordhay 29 boqolkiiba. Waxaa kaloo jira koror 22 boqolkiiba oo NWB ah gobolka Jubbada Hoose, oo inta badani ay sababtu tahay mushqaayad maalmeedka kordhay oo lala xiriirinayo waxsoosaarka dhuxusha ee sida aadka ah uga kordhay gobolka ka dib markii maamulka deegaanka uu ka qaaday xayiraaddii dhoofinta dhuxusha Bishii 8aad ee sanadkan. NWB isma beddelin Baardheere oo ah degmada ugu muhiimsan waxsoosaarka firida ee gobolka Gedo. Sidoo kale, Jubbada Dhexe iyo dhulka beer-xoolodhaqatada Waqooyi-galbeed, NWB ee Bishii 11aad ayaa u dhigma heerarkii Bishii 6aad 2010.


## XOOLAHA

### *Xaaladda Daaqa iyo Biyaha*

Ka dib waxtar xumada roobabka Deyrta, xaaladda cawska iyo caleenta ayaa aad u liidata inta badan koonfurta iyo bartamaha iyo weliba qaybo ka mid ah waqooyiga. Xaaladda biyaha ayaa aad uga liidata sidii caadiga ahayd xooliha ku nool dhulka roob yarowgana waxay billabeen inay caatoobaan.

Dhanka Waqooyi, xaaladda cawska iyo caleentaba ayaa intooda badan wanaagsan gobollada galbeedka ee Awdal, W. Galbeed iyo galbeedka Togdheer, mudnaantana waxa leh waxtarkii dhexdhexaadka ahaa ee roobabkii Deyrta. Xaaladda biyaha iyo daaqaba ayaa soo wanaagsanaaday inta badan dhul daaqsimeedka habnololeedyada Hawdka, xoolodhaqatad Golis/Guban, beer-xoolodaqatad Waqooyi-galbeed iyo Togdheer ee waqooyiga tan iyo Xagaagii dambe. Caws qalalan ayaa weli laga helayaa gobollada Sanaag, Sool, Nugaal iyo Bari intooda badan. Waxaa ugu wacan roobabkii fududaa ee gaargaarka ahaa ee ay heleen Bishii 9aad. Balse, gobolladan waxaa ka jira biyo yari ka dib markii muddo dheer oo Bishii 10aad iyo 11aad oo roob la'aan ahi ay la kulmeen. Biyo iyo baad li'I ba'an ayaa lagasoo sheegay Dharoor/Karkaar ee gobolka Bari ah iyo Xoolodhaqatada Hawdka oo helay roobab dhexdhexaad ah Bishii 10aad ee gobollada Sool, Togdheer iyo Nugaal, ka dib markii xoolo aad u fara badan oo ka kala yimid habnololeedyada deriska la ah ee roob yarowgu ku dhacay kusoo guureen.

**Khariidadda 3: Soomaaliya, Aagagga xoolaha u Hayaameen**




Gobollada Dhexe, biyahii  iyo baadkiiba way ka dhammaadeen dhulka Berkadaha, Waro-wadareedyada iyo waraha leh ee dhul daaqsimeedka Hawd, Cadduun iyo Deexda. Sidoo kale, biyo iyo baad yare ayaa laga soo sheegayaa gobolka Hiiraan, halkaasoo roobabkii Deyrta ay aad u yaraayeen xilligiiyoo dhami. Caws qalalan ayuu leeyahay dhulka lama galaayga ahi ee ka fog meelaha biyaha joogtada ah lihi, mana isticmaali karaan saboolka iyo qoysaska dhexdhexaadka ah intooda badan, maadaama ayna awoodi Karin kharashka biya dhaamiska. Biyo dhaamis inuu ka billaabmay goor hore oo ah Bishii 10aad inta badan habnololeedyada Cadduunka iyo Hawdka, keentayna sicirka biyaha oo aad sare ugu kaca. Daaqa iyo biyo yarida ee Bartamaha awigeed ayaa colaad qabiil ka kicisay waqooyi- bari degmada Galkacyo, kentayna in lagu waayo naf iyo xoolaba.

Dhanka koonfurta, biyaha iyo baadkaba wey ka dhammaadeen dhul-daaqsimeedka roobabkii Deyrta oo liitay Bilihii 10aad iyo 11aad awigeed. Hayaanka xoolaha oo ka imanaya dhulka reerguraaga ee gobollada koonfurta Gedo, Baay, Jubba iyo Shabeelle, iyo weliba Gobolka Waqooyi-bari ee Kenya imanayana dooxooyinka Jubba iyo Shabelle, ayaa weli socda tan iyo Bishii 10aad. Waxaa kale, xoolodhaqatadii kusoo guurtay diisha webiga ee gobollada Jubba iyo Shabelle Xagaagii, ayaa weli kusugan halkaasi ayagoo ku noqon kari waayay dhulkii gudaha oo biyo iyo baad la'aan. Taasina, xoolihii ayaa lagu hayaa meel halis u ah in cudurka Gendiga oo dakhsiga gendiga gudbiyo uu ku dhaco, oo u caado ah diisha webiga xilliganoo kale. Sida lasoo sheegay, daaqa iyo biyaha gabaabsiga noqday, xoolodhaqatada qaar ayaa billaabay inay iibsadaan balkii taagnaa ooy xoolahooda daajiyaan, meeska kuwo kale ay kiraysanayaa beerihii si caws looga helo.

### *Hayaanka Xoolaha*

Sano xumada ayaa sababtay in guurguurka xoolaha ay aad uga muuqato Bishii 11aad gebi ahaan dalka aadaanna dhulka ka biyo iyo daaq roon ee helay roobabkii teelteelka ahaa ee Deyrta (Kariidadda 3). Waxaa kaloo lasoo sheegay in hantiilayaasha Deexda ee Gobollada Bartama ay xoolahooda ku rarayaan baabuurta.


### *Xaaladda Jidhka Xoolaha*

Gobollada waqooyi, xaaladda jirka xoolaha weli wey xooggan yihiin, gaarahaan kuwa gobollada W. Galbeed, Awdal iyo Togdheer ka dib markii ay heleen daaq wanaagsan oo roobkii Gu/karanta oo wanaagsan iyo Deyr dhexdhexaadaba helay. Balse waxaa la filayaa in hoos udhac ku yimaaddo xilliga Jilaalka ee soo socda. Waxaa taa ka duwan, Deexda degmooyinka Eyl iyo Banderbeyla ee waqooyi-bari. Arigii wuu macaluulay uguna wacan tahay abaartii hore iyo waxtar xumada Deyrtan. Sidaa daraateed, inta badan ariga way adag tahay inay ka samata baxaan xilliga Jiilaalka, gaarahaan baraarka iyo waxaraha iyo irmaankaba. Gobollada Dhexe iyo Hiiraan, xooluhu weysii caatoobeen khaasatan lo'da iyo idaha. Halka xaaladda ay aad ugu xun tahay waa habnololeedka Deexda ee gobollada Dhexe oo xooluhu (lo'da iyo idaha) ay aad caato u yihiin, daaq iyo biyo la'aanta iyo fursad hayaan la'aanta awigeed, gaar ahaan qoysaska saboolka iyo kuwa dhexdhexaadka ah. Dhimasho xoolaad ayaa lagasoo sheegay meelo ka mid ah habnolololeedyadan biyo iyo baad yari awigeed. Koonfurta, geelu ma weydsanauguna wacan tahay dhowr xilliyoo hore oo wanaagsanaa. Waxaa ka duwan lo'da irmaanka ah iyo idaha oo caato ah lagana yaabo inay sii weydoobaan Jiilaalka soo socda.

### *Dhalmada iyo Waxsoosaarka Xoolaha*

Dhanka Waqooyiga, dhalmada riyaha iyo idaha ayaa sarreeya, waxaana ugu wacan heerka rimayga ee Jilaalkii iyo Gugii 2010 oo sarreeyay. Balse waxaa taa ka duwan, dhalmada geela ayaa aad u hooseysa maadaama uu geelu aad u rimay Gugii 2010, dhalmadiisana la filayo Guga 2011. Dhalmada lo'da ee beer-xoolodhaqatada waqooyi-galbeed ayaa iyana yar oo ah duunyada ay inta badan dhaqdaan. Sidoo kale dhalmada lo'da ee gobollada Bartmaha iyo Hiiraan ayaa aad u hooseysa uguna wacan tahay rimaygoo aad u yaraa xilligii Guga 2010 sababtuna tahay abaarihii isdaba joogga ahaa. Waxaa ka duwan koonfurta oo dhalmada xoolaha ay dhexdhexaad yihiin marka laga reebo gobolka Bakool, oo dhalmada lo'da ay aad u hooseyso uguna wacan tahay rimaygii oo yaraa xilligii Jilaalka iyo Guga 2010. Waxsoosaarka caanaha iyo oolistoodaba wey ku liitaan dhammaan gobollada waqooyi iyo bartamaha, Hiiraan iyo Bakool maadaama dhalmada Lo'da iyo geeluba yaraayeen oo ah kuwa soosaarka caanaha ugu muhiimsan ee dhulkaasi. Inkastoo gobollada Jubba, Shabelle iyo Baay ay ka caano roonyihii sababtuna tahay dhalmada geela iyo lo'da ee Deyrtii hore iyo Gugii 2010ka oo dhexdhexaad ahaa.

**Jaantuska 4: Isbedellada Sicirrada Riyaha Dabaaxa (SoSh/SlSh)**





### *Ganacsiga Xoolaha, Sicirkooda iyo Nidaamka Wax kala Baddalashada (NWB)*

Sicirka xoolaha ee inta badan suuqyada dalka ayaa isbeddelkooda aanu isku mid ahayn tan iyo Bishii 6aad 2010. Riyaha dabaaxa ahi sicirkooda ayuu kordhay Waqooyi-bari, Bartamaha iyo Koonfurta, uguna wacan tahay u iibsiga ciidda Arrafo iyo weliba dalabka Xajka ee Waqooyiga iyo Bartamaha. Kororka ugu weyn riyaha dabaaxa tan iyo Bishii 6aad ayaa laga soo qoray gobollada Jubba (33%) uguna wacan tahay suuqyada ooy ku yaraadeen (Jaantuska 4). Waxaa ka duwan, dhanka Waqooyi-galbeed oo sicirka riyaha dabaaxa iyo lo'daba ay hoos u dhaceen 14 iyo 8 boqolkiiba, waa say isugu xigaane, tan iyo Bishii 6aad 2010 ka dib markii xoolo badani oo ka yimid gobolka Soomaalida ee Itoobiya ay ku bateen suuqyada Burco iyo Hargeysa muddadii ciidda. Sicirka lo'da ayaa soo dhacay 10-15 boqolkiiba ee waqtiganoo kale ee gobollada laga dhaqdo lo'da ee koonfurta, uguna wacan tahay iibka lo'da oo kordhay si ay u helaan wax ku filan kharashka hayaanka iyo iibka biyaha.

Celceliska NWB ee u dhexeeya rida dabaaxa iyo firida ayaa hoos u dhacay 17% muddadii u dhexeysay Bilihii 6aad -11aad 2010ka ee 2010 uguna wacan tahay hoos u dhaca sicirka xoolaha iyo kororka sicirka firida. Hoos u dhac NWB ayaa ka muuqda Gobollada dhexe (3%) iyo Haruur Tabcatada (12%) uguna wacan tahay sicirka firida ee kordhay. Waxaase ka duwan, NWB ayaa kordhay Jubba (48%), Shabelle (10%) iyo Waqooyi-bari (9%) tan iyo Bishii 6aad 2010, uguna wacan tahaysicirka firida ee dhacday iyo sicirka riyaha dabaaxa ee kacay (Jaantuska 5).

**Jaantuska 5: Nidaamka Wax kala Badalashada – Firida iyo Rida, Waqooyiga iyo Bartamaha**





Wadarta xoolaha ka dhoofay degedda Boosaaso ayaa kordhay 37 boqolkiiba intii u dhexeysay Bilihii 10aad iyo 11aad (min 227,857 ilaa 311,750 neef) halka wadarta xoolaha ka dhoofay degedda Berbera uu kordhay 101 boqolkiiba intii u dhexeysay Bilihii 9aad iyo 10aad (min 275,124 ilaa 552, 579 neef) uguna wacan tahay dalabka xilliga Xajka. Hilibkii dhoofka Bishii 11aad ee kawaanka Burco ayaa hoos u dhaco 48 boqolkiiba (min 2,871 ilaa 1,500 neef) marka la barbar dhigo bishii hore ee 10aad, ka dib markii dalabka xoolaha nool ee Dawladaha Khaliijka uu kordhay.

## SUUQYADA IYO GANACSIGA

### Sarrifka Lacagaha

Shilinka Soomaaliga (SoSh) ayaan aad isu bedbeddelin ama u qiimo jabin Doolar ku baddelashada ee suuqyada muhiimka ah tan iyo qoraalkayagii u dambeeyay (Bishii 9aad '10). Tusaale ahaan, ShSo ee suuqa muhiimka ah Bakaaraha Muqdiho iyo suuqyada lagu kala beddasho lacagaha qalaad ayaa lagu kala iibsanayay celceliska heerka 31,800 halkii Doolar Bishii 11aad 2010, oo muujinaya hoos u dhac 3 boqolkiiba qiimigiisa tan iyo Bishii 9aad ee sanadkan (30,750 SoSh/USDoolar). Hoos u dhac la mid ah kan (1-3%) ayaa lagasoo sheegay suuqyada kalee muhiimka ah ee SoSh laga isticmaalo sida Kismaayo, Jowhar iyo Baydhabo. Shilinku isma beddelin Bishii 11aad wayna isku dhowyihiin (0-2%) marka la barbardhigo bishan bisheedii kale ee sano hore ee suuqyada muhiimka ah ee lasoo xigto.

**Jaantuska 6: Isbeddellada Heerarka Sarrifka – SoSh iyo SlSh / US Doolar**





Waxaa kale, Shilinka Soomaaliland (SlSh) ayaa xoogaysanayay saddexdii bilood ee dambaysay, wuxuun soo kabtay 6-8 boqolkiiba dhammaan suuqyada lasoo xigto. Tusaale ahaan, suuqa sarrifaka ee Hargeysa, lacagta waxay soo kabatay lix boqolkiiba, min SlSh 5,900/USD ee Bishii 9aad ilaa SlSh 5,575/USD ee bishii 11aad. Soo kabashadan waxaa u sabab ah doolarka faraha badan ee ka imanaya waxyaalaha dalku ka helo lacagaha qalaad sida xoolaha dhoofka ee xilliga Xajka iyo jawiga siyaasadeed ee deggan. SlSh ayaa kasoo kabtay Doolarka in ku dhow 5-19 boqolkii tan iyo Bishii 11aad 2009 (Jaantuska 6).


### Sicirka Alaabta lasoo Dejiyo

Sicirka alaabta loo badan yahay soo dejintooda, oo uu ku jiro bariiska, burka iyo shidaalka ayaa yara deggan suuqyada intooda badan tan iyo Bishii 9aad (Jaantuska 7), ooy ugu wacan tahay dekadaha gobollada ay kasoo degaan oo kordhiyay ka dib markii uu dhammaaday xilligii bad xiranka (Bilihii 7aad – 9aad). Waxaa ka duwan, Sokorta iyo saliidda sicirkooda oo kordhay dhinaca koonfurta isla muddadaa. Sokorta iyo saliidda sicirkooda ayaa kordhay 14 iyo 10 boqolkiiba Shabeelle, 19 iyo 10 boqolkiiba Jubba, 4 iyo 7 boqolkiiba Banaadir iyo 14 iyo 3 boqolkiiba habnololeedka Haruur Tabcatada (Jaantuska 7). Waxaa kallifay dhowr arrimood ooy ka mid yihiin sicirka sokorta iyo gallayda oo suuqyada caalamka ka kacay bilihii dambe[1] qiimo dhac yar oo ku yimid SoSh, iyo khalkhal aan kala go'a lahayn ee suuqa weyn ee koonfurta (Bakaaraha) nabadgalyo darrida awigeed.

**Jaantuska 7: Shabeelle – Isbeddellada Sicirrada Alaabta lasoo Dejiyo oo la Barbar dhigay Heerka Sarrifka**




**Jaantuska 8: Isbeddellada Tusaha Sicirka Adeegtaha**




Marka la barbardhigo sanadkii hore (Bishii 11aad '09), ibeddelada sicirka bariiska, Burka iyo saliidda ayaa muujiyay qaab kala duwanaansho, halka sicirka sokorta iyo naaftada ay kordheen waddanka oo idil. Gaarahaan, gobollada sida aadka ah u cuna bariiska ee Bartamaha iyo Waqooyi-bari, sicirka bariiska wuxuu kordhay 14-15 boqolkiiba oo la mid ah sicir kororka suuqyada caalamka (27%)[2]. Waxaase ka duwan sicirka bariiska oo ka hooseeya (6%) Waqooyi-galbeed waxaana ugu wacan suuqa oo kusoo batay firidii deegaanka oo raqiis ah oo sanadkii hadda ahaa si aan caadi ahayn looga soo goostay deegaanka. Haddaynu soo qaadanno, sicirka haruurka ee Waqooyi-galbeed ayaa 30 boqolkiiba ka hooseeya Bishii 11aad marka la barbar dhigo isla bishaa oo sanadkii hore ah. Dhanka kale, sicirka burka ayaa ka hooseeya Waqooyi-galbeed (18%), Banaadir (7%) iyo Haruur Tabcatada (10%) balse ka sarreeya (3-11%) qaybaha kale ee dalka. Waxaa intaa dheer, Saliidda ayaa muujinaysa isbeddel sare ah dhinaca koonfurta[3], halka dhulka intiisa kale ay yara deggantahay ee Waqooyi-bari iyo Bartamaha iyo hakad galinta Waqooyi-galbeed (12%). Waxaa taa ka duwan, Sirka sokorta iyo Naaftada ayaa mujiyay koror wax ku ool ah oo 14-24 boqolkiiba ah dalka oo idil isla muddadaa. Sicir suuqa caalamka ee kacaya awigeed ee alaabtan (7% sokorta4 iyo 8% shiddaalka5).

1 FAO, Sadaasha Cuntada, Bishii 11aad
2 Is barbar dhigga sicirrada Bishii 11aad ee 2009 iyo Bishii 11aad 2010, Bariiska Cadee Jajaban, Thai A1 Super, f.o.b Bangkok; FAO Xogta Sicirka Caalamka
3 Koroka u sarreeya, oo u dhigma 15-22% ayaa lagu arkay gobollada Jubba iyo Shabelle
4 FAO, Sadaasha Cuntada, Bishii 11aad
5 Saliidda Isku-dhaffan, Dubai ee Markaba Saaran; Ilaha: IMF Sicirka Badeecadda Muhiimka ah; http//www.imf.org/external/np/res/commod/index.asp

**Tusaha Sicirka Adeegtaha**

Tusaha Sicirka Adeegtaha (TSA), oo ku salaysan waxa ugu yare e dambiisha qoyska ku qaato ee Soomaaliya, ayaa xawaare isku taagay gobollada dalka oo dhami Bishii 11aad 2010. Laga soo billabo bishii hore, sicir bararku si dhakhso ah ayuu u kacay (11%) koonfurta, waxyar kaliya ayuu kacay Bartamaha iyo Waqooyi-bari (3-4%) halka inta soo hartay oo Waqooyi-galbeed ah ay degganayd. Xawaaraynta TSA ee gobollada SoSh ku adeegta ayaa ugu wacan isbedbeddelka sicirka sokorta, saliidda, Haruurka iyo caanaha oo wadartooda ku baxdo qayb ballaran kharashka dambiisha ee gobollada kala duwan ee Soomaaliya (42-66%). Sida, sicir bararka koonfurta uu uga mid yahay sicirka haruurka (16%), Caanaha (36%), Sokorta (8%), Burka (3%) iyo saliidda (4%) ee Bishii 11aad 2010. Sicir bararku wuu ka sarreeyaa sannadka gundhigga ah 2007 (Bishii 3aad) ee dhulka SoSh (12%) balse xoogaa ayuu ka hooseeyaa dhulka SlSh ee Waqooyi-galbeed (8%) (Jaantuska 8).

**XAALADDA NAFAQADA**

Intii u dhexeysay Bishii 11aad iyo bartamihii Bishii 12aad 2010, FSNAU/UNICEF oo la macaamiltamaysa wasaaradaha caafimaadka ee Puntland, Somaliland, Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS) iyo Medair ayaa 17 kormeer nafaqo ka qabtay Gobollada Dhexe, Puntland iyo Somaliland oo ku salaysan habka heerka. 7 ka mid ah kormeerrada ayaa laga qabtay barakacayaasha Hargeysa, Burco iyo Berbera ee Soomaaliland, iyo Garowe, Galkacyo, Boosaaso iyo Qardho ee Puntland, tobanka kalena waxaa laga sameeyay habnololeedyada reer miyiga. FSNAU ayaa weliba ka samaynaysa kormeerka degdegga ah xarumaha magaalooyinka. Xog ururintii toban ka mid ah kormeerradii ayaa lasoo dhamays tiray iminkana socda falanqayntoodii. Kormeero dheeri ah ayaa qorshaysan in laga sameeyo Gedo, Juba, Baay, Bakool, Hiiraan iyo Shabeelle Bishan 12aad 2010.



**Kooxdii Kormeeryaasha oo Waraysanaysa hooyo, Gaalkacyo Xerada Barakacayaasha**

Billowgii hore ee natiijada ayaa muujinaya heerarka Nafaqo-darrida Ba'an ee Caalamiga (GAM) iyo Nafaqo-darrida Aadka ah ee Ba'an (SAM) oo ah **13.0** (10.4-16.2) iyo **2.9** (1.8-4.7) oo habnololeedka Hawdka ah, **11.0** (7.7-15.5) iyo **2.5** (1.3-5.1) oo habnololeedka Cadduunka, iyo **12.8** (10.0-15.9) iyo **1.5** (0.4-2.3) oo gobolk Galgaduud ah, waa siday isugu xigxigaane, waxayna muujinayaa in xaaladda nafaqo ay tahay mid ***Daran***. Natiijadu waxay muujinaysaa inay kasoo raynayso sidii Gugii 2010 ay ahayd, markaasoo ay ahayd mid *Ba'an ama Aad u Ba'an* Hawdka iyo Cadduunka oo herka GAM ka uu ahaa 15.3 (12.0 – 18.6) iyo 22.8 (19.2-27.0) iyo heerka SAM ka oo ahaa 3.9 (1.6-6.1) iyo 7.1 (4.7-10.5) oo ah siday isugu xigaan. Isbeddelku waa caddaynta qorshaynta ee Cadduun (p=0.000), inkastoo aanay ahayn habnololeedka Hawdka (p=0.284). Dooxada Nugaal, heerka GAM ka waa **10.3** (7.0-14.8) SAM kana waa **1.0** (0.83-3) oo muujinaysa xaalad ***Daran***, wayna sii xumaanaysa, balse ma aha caddayn qorshayn (p>0.05) laga soo billaabo Gugii 2010 oo GAM ku ahaa >8.8% (Pr=0.90) xaaladdana lagu qeexay *Feejigoon.* (Shaxda 1 waxay ku tusaysaa natiijadii oo kooban).

Deegaannada Barakacayaasha ee Waqooyi-galbeed ee Hargeysa, Burco, iyo Berbera, Heerka GAM ka waa **10.8** (8.9-13.0), **12.1** (8.8-15.4) iyo **14.2** (10.9-18.3) oo ah siday isgu xigaan, dhammaantood waxay muujinayaan xaalad ***Daran*** oo ah mid kasoo wanaagsanaatay Gugii 2010 oo ahayd mid *Ba'an.* Xeryaha barakacayaasha Waqooyi-bari ee Garowe, Gaalkacyo iyo Boosaaso, heerka GAM ku waa **13.3** (11.0-15.9), **16.3** (13.2-20.0) iyo **15.6** (12.7-19.1) oo muujinaya inay weli ku jiraan xaalad *Daran* kuwa Garowe, xaalad *Ba'an* kuwa Gaalkacyo iyo Boosaaso. Xaaladda Gaalkacyo ayaa kasii xumaanaysa heerarkii *Daranaanshaha* halkii xaaladdii Guga '10 ay ahayd GAM ka >11.3, Pr=0.90, halka Boosaaso ay kasoo wanaagsanaatay *Aad u Ba'naanshihii* (heerka GAM ka >26.0, Pr=0.90).

**Shaxda1: Kormeerradii Nafaqo oo Kooban (Bilihii 11aad iyo 12aad 2010)**

| **Population Assessed** | **GAM** ((WHZ<-2 or oedema, WHO GS) | **SAM** ((WHZ<-3 or oedema, WHO GS) | **Crude death rate (CDR)/10,000/ day** |
|---|---|---|---|
| Hawd LZ | **13.0** (10.4-16.2) N=593 | **2.9** (1.8-4.7) | **0.33** (0.15-0.71) N=2350 |
| Addun LZ | **11.0** (7.7-15.5) N=591 | **2.5** (1.3-5.1) | 0.70 (0.42-1.17) N=3161 |
| Galgadud Region | **12.8** (10.0-15.9) N=591 | **1.5** (0.4-2.3) | 0.67 (0.43-1.02) N=4653 |
| Nugal Valley (Sool-Nugal) | **10.3** (7.0-14.8) N=510 | **1.0** (0.8-3.3) | 0.53 (0.32-0.90) N=2638 |
| Hargeisa IDPs | **10.8** (8.9-13.0) N=651 | **1.5** (0.8-2.8) | 0.58 (0.31-1. 06) N=1148 |
| Burao IDPs | **12.1** (8.8-15.4) N=652 | **1.7** (0.5-2.9) | 0.47 (0.29-0.75) N=4243 |
| Berbera IDPs | **14.2** (10.9-18.3) N=542 | **2.2** (1.2-4.1) | 0.12 (0.05-0.33) N=3563 |
| Garowe IDPs | **13.3** (11.0-15.9) N=761 | **2.5** (1.6-3.9) | 0.24 (0.10-0.60) N=3675 |
| Galcayo IDPs | **16.3** (13.2-20.0) N=869 | **2.9** (1.8-4.5) | 0.98 (0.51-1.85) N=3917 |
| Bossaso IDPs | **15.6** (12.7-19.1) N=749 | **2.8** (1.6-4.8) | 0.65 (0.39-1.08) N=3532 |

Marka laga reebo habnololeedka Cadduunka oo 3.4% ah, heerka SAM kaa ah <3% dhammaan kooxihii dadka ahaa ee kormeeray. Waxaa labeeya, heerka dhimashada aan kala soocnayn ayaa ka hoosaysa 0.5/10,000 maalintii oo ah heerka la aqbali karo (marka la eego Kalasooca WHO) dhammaan kooxihii dadka ahaa ee la kormeeray marka laga reebo Cadduun, Dooxada Nugaal, Barakcayaasha Hargeysa iyo gobolka Galgaduud oo heerarkooda uu ka sarreeyo 0.5 balse uu ka hooseeyo 1/10,000 maalintii oo muunjinaysa xaalad *Feejigoon.* Waxaa latuhunsan yahay in dhimashadu sababsatay waa shubanka dhammaan kormeerradoo idil, marka laga reebo Hargeyso ooy u badan tahay Jadeecada.

Guud ahaan kasoo rayntani ee gobollada Bartamaha iyo xeryaha barakacayaasha yay u badan tahay inay la xiriirto waxtarkii wanaagsanaa ee xilligii Guga, oo wanaajiyay xaaladda jirka xoolaha oo kordhiyay helitaanka caanaha dhaqaalaha qoyska. Taageerada samafalka oo weli ka socota gobolka. Falanqayntan oo faahfaahsan ayaa laga heli doonaa Bilaha 11aad – 12aad Xogta Nafaqada Dhamaystiran oo ku began in la soo shaac bixiyo dabayaaqada Bisha 12aad.

# ISKUDHAFKA FALANQAYNTA SUGNAANTA CUNTADA

## REER MAGAALKA

Soaring cereal prices in Sicirka firida ee sii kordhaya ee dalka intiisa badan caddayn horaadna u ah dalggii Deyrt ee ba'ay aya billabay inay saamayso hilitaanka cuntada ee reer magaalka. Waxaa caddayn u ah awoodda wax iibsiga ee saboolka reer magaalka oo wiiqantay, iyadooy ugu wacan tahay kororka sicirka firida, hoos udhaca nidaamka wax kala baddelashada iyo kororka sicirka nolosha. Waxaa ku darid leh, colaadan socota ee koonfurta iyo bartamaha iyo barakacayaasha faraha badan ee ku sugan xarumaha magaalooyinka ayaa iyana sii xumaynaya xaaladda sugnaanta cuntada ee saboolka reer magaalka. Ififaalaha waxsoosaarka cuntada ee Deyrta ee liita iyo xaaladda nabadda ee aan degganayn ee dalka, sicirka firida ee sii kacaya tan iyo xilliga ku xiga ee waxsoosaarka (Bisha 8aad '11) ayay u badan tahay in dalka intiisa badan, ay saamayn doonto sugnaanta cuntada ee qoysaska saboolka reer magaalka.

**Sicir Bararka iyo Qiimaha Kharashka ugu Yar ee Dambiisha**


Sicirka nolosha magaalooyinka dalka oo dhami ee bilihii u dambeeyay ayaa ka kordhay heerkii uu ahaa Bishii 6aad 2010. Waxaa mid-dani muujinaysa kororka qiimaha kharashka ugu yare e dambiisha (KhYD). Halka sicirka dambiisha uu yara degganaa magaalooyinka ku adeegta SlSh, kororka la dareemi karo ayaa lagu arkay inta badan dhulka SoSh lagaga adeegto. Tusaale ahaan, celceliska sicirka KhYD ee koonfurta ayaa kordhay 15 boqolkiiba intii u dhexeysay Bishii 6aad iyo Bishii 11aad 2010 oo ka sarreysa 22 boqolkiiba Bishii 11aad ee sano hore. Sicirka KhYD ee Bartamaha ayaa kordhay 13 boqolkiiba 9 boqolkiiba marka la barbardhigo isla waqtiyadaa. Halka Waqooyi-bari, sicirka KhYD uu 7 boqokiiba ka sarreeyo Bishii 6aad 2010, balse uu la mid yahay markii la barbar dhigay Bishii 11aad ee sano hore. Kororka ugu badan ee sicirka KhYD ee shantii bilood ee u dambeysay ayaa laga helay Beletweyne (30%), Elbarde (31%) iyo Baydhabo ((18%), iyo Gobollada Dhexe ee Cabudwaaq (20%) iyo Ceeldheer (21%). Sicirka ugu yaree nolosha ee buurta noqday ee magaalooyinkan waxaa u sabab ah sicirka xad dhaafka ah ee haruurka (20-60%), burka (12-26%), sokorta (7-39%), saliidda cuntada (8-22%) iyo weliba caanaha (16-141%).

Guud ahaan, kororkan sicirka firida wadaniga ah, raashinka lasoo dejiyo (sokor iyo saliid) iyo caanaha ayaa ah waxa ugu muhiimsan ee sare u qaadaya sicirka maciishadda ee koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya (eeg Qaybta Suuqa). Sicirka firida ee kordhay, kharashka ugu muhiimsan ee saboolka reer magaalka, weliba caanaha ayaa la xiriirin karaa Deyrtan waxtarkeedii xummaaday, oo yareeyay waxsoosaarkii xoolaha iyo beeraha dalka intiisa badan. Colaadan siyaasadeed ee soo noqnoqonaysa iyo is haysiga ee agaggaasi, khaasatan Muqdisho, Beletweyne, Magaalooyinka Galgaduud iyo isku dhacyada xillixilliga ah ee ka dhaca aybo ka mid ah Gedo iyo Bakool, ayaa iyana sabab u ah inay kordhaan sicirka maciishadda iyagoo khalkhaliya ganacsiga, helidda suuqa iyo dhaqdhaqaaqa alaabada ganacsiga.

**Shaqo Helista iyo Heerka Mushqaayadda**

Isbeddellada heerarka mushqaayadda ee hawlaha muruq-maalka[1], oo ah waxa ugu muhiimsan ee saboolka reer magaalka uu lacag ka helo, ayaa ku kala duwan qaybaha kala duwan ee dalka tan iyo Bishii 6aad ee sanadkan (Jaantuska 9). Koonfurta, heerka mushqaayadda (Bishii 11aad '10) labadii magaalo[2] ee la kormeerayba mid ayaa raacay isbeddel xilliyeedka, muujinaya koror xilligii Xagaaga (Bilihii 7aad-9aad '10) hoosna u dhacaya xilligii Deyrta (Bishii 11aad '10). Heerarka mushqaayadda ee hadda ee gobollada intooda badan ee koonfurta ayaa u dhexeeya SoSh 64,000 iyo SoSh 130,000. Balse, heer aad u hooseeya, una dhigma SoSh 38,000-45,000, ayaa lagu arkay gobolka Bakool uguna wacan tahay colaad xilliyeedka oo khalkhalisa ganacsiga iyo howlaha suuqa.

**Jaantuska 9: Ibeddellada Celceliska Mushqaayadda Magaalo ee Dhulka SoSh iyo SlSh lagag Adeegto**




Gobollada Dhexe, mushqaayaddu hoos ayay u dhacaysay tan iyo Bishii 6aad 2010, gaarahaan degmooyinka Cabudwaaq, Ceeldheer iyo Xaradheere uguna wacan tahay colaadda iyo is haysiga aan kala go'a lahayn, iyo khalkhalinta ganacsiga iyo hawlaha dhaqaalaha ee isdaba jooga ee aaggaa. Tan iyo Bishii 6aad ee sano hore, heerka mushqaayadda ee Cabudwaaq, Xaradheere, iyo Ceeldheere ayaa hoos u dhacay inta u dhexeysa 22-32 boqolkiiba, oo u dhiganta SoSh 82,000 iyo SoSh 56,000 Bishii 11aad 2010. Mushqaayadda Gaalkacyo iyo Dhuusamareeb isma beddelin maadaama jid laami ah ay haystaan kharashka gaadiidkana uu ka hooseeyo.


1 waxaa loo eegay shaqada shaqaalaha aan aqoon u lahayn dhismaha ama xamaaliga, oo ah ka u badan ama loo badan yahay ee muruqmaalka magaalooyinka
2 Marka iyo Afgooye (Shabeelada Hoose), Bu'aale (Jubbada Dhexe), Kismaayo (Jubbada Hoose), Beletweyne (Hiiraan), Xuddur (Bakool) iyo Baardheere (Gedo).

Ma jiraan wax isbeddel ah oo ku dhacay heerarka mushqaayadda ee Waqooyiga isla muddadaa la barbar dhigay, aan ka ahayn 15 boqolkiiba oo uu kordhay Garoowe (Nugaal) uguna wacan tahay qaybta dhismaha ee sida xoogga leh uga socota iyo hoos u dhac 14 boqolkiiba Boorama (Awdal) uguna wacan tahay hawlihii dhaqaalaha oo hoos u dhacay ka dib markii uu dhammaaday Xilligii Xagaa baxa[3]. Waqooyi-bari, heerka mushqaayadda hadda waa inta u dhexeysa So.Sh 80,000-120,000, oo Boosaso ay tahay midda ugu mushqaayad hooseysa, uguna wacan tahay shaqo u tartanka ka dhexeeya saboolka reer magaalka iyo dadka barakacayaasha[4] oo aad u sarreeya. Heerka mushqaayadda ee Waqooyi-galbeed ee SlSh lagaga adeegto ayaa u dhexeeya SlSh 25,000 iyo 30,000 (Jaantuska 10).

**Awoodda Wax Iibsiga**

Nidaamka Wax kala Beddelashada (NWB) ee u dhexeeya mushqaayadda iyo firida, oo lagu cabiro qiyaasta awoodda wax iibsiga ee saboolka reer magaalka, ayaa iyana muujisay kala duwanaan tan iyo Bishii 6aad 2010. NWB si wax ku ool ah ayuu hoos ugu dhacay magaalooyinka intooda badan ee koonfurta iyo bartamaha bilihii 10aad iyo 11aad ee sanadkan ka horna sare ayay u kaceen bilihii 6aad-9aad, ka dib markii beerihii Guga la goostay, sicirka firidana ay hoos u dhacday. Koonfurta, NWB (Mushqaayad maalmeedka inta ay ka gooyso haruurka ama gallayda waddaniga ah) ee magaalooyinka ku yaalla meelaha sida weyn usoo saara firida ee gobollada koonfurta (Shabeelada Hoose, Jubbada Dhexe iyo Baay) ayaa heer aad ah u yaraaday marka loo fiirsho dhulka intiisa kale. Isbeddelkani waxa ugu wacan waa kororka sicirka firida iyo hoos u dhaca mushqaayadda shaqo oo kasoo jeeda waxtar xumada roobabkii Deyrta, oo saameeyay waxsoosaarkii beeraha cuntada yareeyayna fursadihii shaqo helista. NWB ee gobolladan ayaa aad uga hooseeya heerarkii sano hore (42%, 55% iyo 61%, say isugu xigeene) iyo celcelisyada shan-sano (2003-2007) oo muujinaya xaaladda xun ee saboolka reer miyiga ku wajahan. Isbeddelo la mid ah oo diciifinaya awoodda wax iibsiga ayaa lagu arkay inta badan magaalooyinka Gobollada Dhexe, marka laga reebo Gaalkacyo oo nidaamku uu kordhay 38 boqolkiiba uguna wacan tahay sida wax ku oolka ah ee sicirka haruurka uu u kordhay (29%) tan iyo Bishii 6aad ee sanadkan. Waxaa ka duwan, NWB ayaa degganaa waqooyiga oo xoogaa faraq kor-iyo-hoos u dhac ahi ka jireen meelo ka mid ah intii u dhexeysay bilihii 6aad-11aad 2010. (Jaantuska 10).

**Jaantuska 10: Reer Magaalka Nidaamka Wax kala Beddeleshada (NWB) Haruurka ku Mushqaayad shaqo maalmeedka ee Aagagga**




## REER MIYIGA

***Gobollada Koonfureed***

Xaaladda sugnaanta cuntada ayaa billowday inay xumaato koonfurta Soomaaliya ka dib markii xilligii Deyrta la waayay oo saamayn weyn ku yeelatay xaaladda xoolaha iyo beeraha. Waxaa xaaladdani sii xumeeyay colaadda sokeeye ee kasii dareysa ee sababtay barakaca dadweynaha gobollada Muqdisho, Shabelle, Hiiraan, qaybo ka mid ah Gedo, Bakool iyo Baay.



*Xoolo ka sugaya biyo ceelasha Afmadow*

Cimillada kulul ee qallalan ee weli ka jirta koonfurta Soomaaliya bilihii 10aad iyo 11aad iyo Xagaagii ka horreeyay ee isna qallalnaa ayaa sababay cawska, caleenta iyo biyaha inay yaraadaan, gaar ahaan dhulka roob-waraabka ah. Waxay sababtay, in xooluhu (khaasatan ariga iyo lo'da) ay goor hore ka hayaamaan dhul daaqsimeedkii muhiimka ahaa ee aaggooda welina socda xooluhuna waxay billaabeen inay caatoobaan, khaasatan lo'da iyo kuwa irmaan. Roobkii Deyrta ee la waayay Soomaaliya oo biirsatay roobabka caadiga ka hooseeya ee buurallayda Itoobiya ayaa si wax ku ool ah u yaraysayawooddii waraabka ee wabiyada Jubba iyo Shabelle xilligii Deyrta 2010/11. Guud ahaan muuqaalka beeraha ee Deyrta 2010/11 ayaa aad uga hooseesa caadigii ooba ku dhaw in dalagba ka soo gu'in dhulka beer-xoolodhaqatada koonfurta ka dib markii uu qoyaanku ku yaraaday muddo dheer. Fursadihii hawlaha beeraha ayaa iyana dhulka intiisa badan yaraaday, maadaama ay jirtay xogaa hawlihii abuuridda iyo falidda. Waxaa lagu war helay in dhulka diisha webiga ku badanayaan waraabka si loo soo saaro bal-daaq, halkaasoo ififaalaha soosaarka firida aanay haboonayn.



*Xoolo isku dul tuba nee ceelka Taabt, Afmadow, Jubbada Hoose, FSNAU, Bishii 10aad '10*

3 Waa xilli ay dad badan oo dadweynaha reer magaalka ee xeebaha iyo Jabuuti ay yimaadaan magaalooyinka gudaha sida Hargeysa, Boorama, Burco, Sheekh, iyo dhulka reer miyiga is ay uga baxsadaan xilliga kuleylaha (Bilaha 5aad-9aad)

4 Boosaaso ayaa haysa tiro badan oo barakacayaal ah oo kula tartama saboolka magaalada shaqooyinka iyo fursadaha kaalmada bulshada

Sicirka firida ayaa si aad ah u kacay intii u dhexeysay Bilihii 10aad iyo 11aad 2010 dhammaan suuqyada gobollada firida soosaara ee koonfurta Soomaaliya uguna wacantahay aaminaadda in Deyrtan ay firi yar soo gu'I doonto. Tani waxay ka tarjumaysaa in isbeddel hoos u dhac ah ku imanayo awoodda wax iibsiga ee qoysaska ee gobollada intooda badan, kana mid yihiin Hiiraan, Jubbada Dhexe, Gedo iyo Baay. Waxaa taa ka duwan, maadaama ay jirto sahay firi oo wax ku ool ah oo ah waxsoosaarkii wanaagsanaa ee Guga, sicirka firida ee gobollada Shabelle ayaa ka yar heerarkii Bishii 6aad 2010. Sidaa daraaddeed, awoodda wax iibsiga ee gobolladan ayaa weli Bishii 11aad ka xooggan Bishii 6aad. Sidoo kale, awoodda wax iibsiga waa ay sarreysaa Jubbada Hoose iyadoo ooy ugu wacan tahay mushqaayadda shaqo oo korortay ka dib markii soosaarka dhuxusha xoogsatay. Hase ahaatee, hoos u dhaca xoogga leh ee firidii Deyrta ayaa kordhin doonta sicirka firida bilaha soo socda, oo isla markaana muujisay hoos u dhac ku yimaadda awoodda wax iibsiga dhulkan intiisa badan, kana midyihiin Jubba iyo Shabelle.

***Gobollada Dhexe (Mudug, Galgaduud iyo Hiiraan)***

Suknaanta cuntada ee Gobollada Dhexe gaara ahaan Deexda, Cadduunka iyo Digir Tacbatada, ayay hoos u dhacday ka dib markii ay muddo yaroo gaaban oo Gugii 2010ka ah ay xogaa horumar ah sameeyeen. Deyrtan baaqatay ayaa ah waxa ugu weyn ee xumeeyay xaaladda. Wax yaalaha kale ee sii xumeeyay xaaladda waxaa ka mid ah, Colaaddan ballaran, barakacayaasha badan eek u sugan gobolka, ganacsigan khalkhalka galay, sicirka firida ee sarreeya, hantida qoysaska reer guuraaga ee gudhaysa iyo kororka reer guuraaga ay xooluhu ka dhammaadeen ka dib markii ay dhowr xilli oo isdaba jog ah oo roob la'aan ah ay soo martay.



***Riyo weyd ah oo Jooga Deexda Gobollada Dhexe, FSNAU, Bishii 11aad***

Waxaa taa ka duwan, Hawdka Gobollada Dhexe, roobabki dhexdhexaadka ahaa ee Bishii 10aad ayaa xoogaa hagaajiyay xaaladda daaqa iyo biyaha, deedna wanaajisay xaaladda jirka xoolaha iyo helidda xoolo iibsami kara ee qooysaska. Hase yeeshee, jiritaankii wanaagga daaqa iyo biyaha ee hawdka ayaa so oaf jarmay ka dibkii markii ay kusoo guureen xoolo fara badan oo ka kala yimid deriska ay roob la'aanta ku dhacday. Hayaan aan caadi ahayan ayaa ka dhacay habnololeedyada Deexda, Cadduunka iyo qaybo ka mid ah xoolo-dhaqatada ooy kala aadeen gobollada deriska la ah ee dalka, iyo weliba gobolka ay Soomaalida ee Itoobiya, oo dhaliyay qoysaska oo qaybsama iyo iska horimaadyada ka imanaya daaqa iyo biyaha gabaabsiga noqday. Xaaladda habnololeedka Digr Tabacatada ee gobollada Mudug iyo Galgaduud way kasii dartay tan iyo Gugii 2010, ugun wacan tahay laba xilliyoo aan wax laga goosan beeraha iyo fursaddii shaqada beeraha oo yaraatay, sida abuuristii, falidii iyo goosashadii, iwm.

Inkastoo daaqa iyo biyaha ee Gobollada Dhexe ay sii xumaatay, sicirka rida ayaa kacay (8%) Bishii 11aad marka la barbardhigo Bishii 6aad, inta bandanna waxaa sababay xilligii dhowaa ee Xajka. Waxaa taa ka duwan, NWB ee u dhexeeya rida iyo bariiska ayaa xoogaa yar hoos u dhacay uguna wacan tahay sicirka bariiska ee 10% kacay marka la barbardhigay Bishii 11aad ee sano hore. NWB ee u dhexeeya mushqaayadda iyo firida ee bariiska iyo Haruurkaba ayaa hoos u dhacay uguna wacan tahay kororka heerka mushaqaayadda (17%) iyo kororka sicirka firida. Sidaa daraadeed, xaaladda sugnaanta cunta ee Gobollada Dhexe ayaa sii liidan doonta, ugu yaraan ilaa xilli roobeedka ku xiga. Wax yaalaha ugu muhiimsan ee sii xumaynaya nolosha ayaa waxaa ka mid ah sicirka biyaha ee kacaya, dakhliga kasoo galaya iibka xoolaha ee yaraaday, hoos u dhaca awoodda wax iibsiga ooy sabab u tahay kororka sicirka firida iyo khalkhalka galay suuqa uguna wacan tahay colaaddan ku baahaysa aaggaas.

***Gobollada Waqooyi***


Xaaladda Waqooyiga ee iminka ayaa kala duwan, oo xoogaa horumar ah ay ka muuqato habnololeedyada gobollada Awdal, W. Galbeed balse ay ka darayso dhulka intiisa kale. Horumarka gobollada aan soo sheegnay ayaa ugu wacan roobabkii caadiga ahaa ee Deyrta iyo roobab lama filaan ah ooy habnololeedka Gubanka ee gobolka Awdal ay heleen, oo wanaajiyay xaaladda daaqa iyo biyaha oo isla markaana wanaajiyay xaaladda jirka xoolaha. Roobabkii dhowaan ay heleen Gubanka ayaa caawiyay xoolihii kasoo guurayay Goliska. Dhalmada ariga oo sarreysa iyo caanaha oo kordhay ayaa laga soo sheegay dhammaan habnololeedyada labadaa gobol. xaaladda beeraha ayaa wanaagsan (soo bixitaanka iyo koritaanka) ee qaybo ka mid ah beer-xoolodhaqatada Awdal iyo W. Galbeed. Waxyaalaha kale ee sababay wanaagsanaanta xaaladda sugnaanta cuntada waa, hawlaha ganacsiga xoolaha iyo sicirka xoolaha oo kordhay



***Daaqa Liita ee Dooxada Nugaal ee Waqooyi-galbeed, FSNAU, Bishii 11aad '10***

dalabka dhoofka xoolaha Xajka oo sarreeya awigeed; sicirka firida (haruurka iyo Galleyda) oo hoos u dhacay uguna wacan tahay wax soosaarkii dalagga ee wanaagsanaa ee sanadkan; mushqaayada oo sarreysa iyo awoodda wax iibsiga oo xooggan. Bishii 11aad, NWB ee firida dalka iyo rida dabaaxa ee gobolladan ayaa 17-22 boqolkiiba ka sarreysa markii la barbar dhigay bishii la midka ahayd ee sanadii lasoo dhaafay.

Waxaa ta ka duwan, xaaladda ayaa ka daraysa qayba kale ee Waqooyiga-galbee iyo dhammaan gobollada Waqooyi-bari. Gaar ahaan, roobabkii Deyrta oo aad u xun ayaa ku xigsaday Xagaagii ingegnaa oo saamayn xun ku yeeshay habnololeedyada Dooxada Nugaal ee gobollada Sool, Sanaag iyo Nugaal, Reer guuraaga Sool, Xeebta Deex, Cadduun iyo beer-xoolodhaqatada Togdheer. Waxay kaloo xaaladda ay sii xumaanaysaa habnololeedyada Hawdka iyo Karkaar/Dharoor, oo iyagu helay roobab dhexdhexaad ah Bishii 10aad, oo biyihii iyo baadkii isasoo tarayay markii ay roobabku da'ayeen ayay si dhakhso ah u dhammeeyeen xoolihii faraha badnaa ee uga soo guuray dhulka derisk ah ee roob la'aantu ku dhacday. Xoolaha jooga dhulka roob la'aanta ku dhacday ayaa billabay inay weydoobaan, halka habnololeedyada Deexda, Cadduunka iyo Soolka uu mar hore jirkoodii uu dhammaaday. Sidaa daraadeed, Deexda, Cadduunka iyo Oogada Sool ayay u badan tahay inay la kulmaan xaaladda ugu xumayd ee sugnaanta cuntada marka la barbar dhigo habnololeedyada kale ee waqooyiga.



***Waxyaalihii u dambeeyay ee la Dabaacay ama la baahiyay***

*FSNAU/FEWSNET  Xogta Cimilada Dhamaystiran, Bishii 11aad 2010*
*FSNAU/FEWSNET  Xogta Suuqa Dhamaystiran, Bishii 11aad 2010*
*FSNAU Taxanaha Farsamo ee Warbixinta Xaaladda Nafaqo, Bishii 11aad 2010*
*FSNAU Xogwarrankii Afar-biloodlaha Bishii 10aad*
*FSNAU Taxanaha Farsamo ee Warbixinta Xaaladda Nafaqo, Bishii 9aad 2010*
*FSNAU Taxanaha Farsamo ee Warbixinta Falanqaynta Gugii '10 Dababdii, Bishii 9aad 2010*

*Ogow: Daabacaadahan iyo Xog-baahinnadan ayaad ka heli kartaa Shabkadda FSNAU: www.fsnau.org*

Technical and Managerial Support

Funding Agencies